



August 15, 2019

Waalidiinta qaaliga ah Masuuliyiinta:

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqno iskaashi cusub oo u dhaxeeya Dugsiyada Dadweynaha Shakopee iyo Maktabadda Degmada ee Scott coonti, taas oo siin doonta ardayda dugsiya sare ee iyo dugsiya dhexe Shakopee kaar maktabadeed (virtual library card) oo lacag la'aan ah.

Iskaashigan, oo la yiraahdo Kaarka Maktabada Ardayga ee Virtual library card, wuxuu hubiyaa in ilaha maktabadaha guud ay qayb ka noqon karaan khibrada waxbarasho ee arday kasta. Maktabadaan dadweynaha Ardeydu waxey ka faa'iideysankaraan kana heli karaan waxyaabo badan oo anfacaya, waxyaabahaas oo ay ka midyihiin in online ay ka baran karaan, in online lagacaawiyo home workyada, sida loo raadiyo buugaagta onlinka, kuwa laga dhageysto onlika, iyo joornaalada electaroonika ah. Kaarni waxuu kuu ogolyahay in aad ka qaadatao labo shay maktabada Dadweynaha.

Iskaashigan cusub wuxuu isku soo dhaweynayaa iskuulada iyo bulshada kuwaas oo gacan ka geysan kara in la ballaariyo ardayda fahamkooda, kor u qaadida akhrisqoraalka, iyo bixinta qaabab dheeraad ah ee dhinaca barashada. Degmadu waxay siisay arday kasta MacBook's si waxbarashadoodo ugu fudutaato, Kaarkan wuxuu bixiyaa awoodda si loo kordhiyo adeegsiga maktabada dadweynaha.

Kaarka Maktabada Virtual Student Library waxaa loo isticmaali karaa internetka iyo maktabaddaba, wuxuuna dhacayaa 1da Luulyo marka Ardeygu qalinjabiyaan. Ardayda looma qiimeeyo ganaaxyada la soo daahida haddii ay buugii ay la soo daahaan, laakiin waxay masuul ka yihiin haddii buugii uu jeexmo ama dilaaco iyo haddii uu lumay. Ardayda hore u haystay kaarkan maktabada way isticmaali karaan weyna ku qaadan karaan buugaag. Fadlan waxaad ogaataa in Virtual Library cardka ee iskuulka iyo kan Scott kaanti in uu ardayda siinayaa fursad isku mid ah.

Fursadaan waa ikhtiyaari oo micnaheedu yahay Haddii ardayda ama qoysaska ay jecel yihiin in aysan isticmaalin kaarkan way iska diidi karaan. Waxay sidoo kale ka buuxin karaan foomka diidmada digitalka ah bit.ly/cardoptout ama foomka sooceshiga warqadda (eeg dhinaca kale). Waxaan ku faraxsanahay dhammaan siyaabahaan wadashaqeyntan ay uga faa'iideysan doonaan ardaydeena iyo waxbarashadooda. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan kala xiriir parenthelp@shakopee.k12.mn.us.

Si daacad ah,

Dr. Mike Redmond

Kormeeraha Guud ee Dugsiyada Dadweynaha Shakopee

Kaarka Maktabada Ardayda ee Virtual Virtual

Sidee ardaydu u heli karaan kaarka Maktabadda Virtual Student Library? Ardaydu waxay heli doonaan email ku saabsan sidii loo isticmaali lahaa una tilmaamaya kaarkaan.

Maxay ku heli kartaan kaarka Maktabadda Virtual Student Library? Ardaydu waxay heli doonaan fursad ay ay kaga soo qaataan buugaag digital ah ama labo buug oo caadi ah Maktabadda Scottkaanti. Ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay helaan dhammaan waxyaabaha uu kaadhka maktabadda caadiga ah lagu qaato.

Maxaa dhacaya haddii ardaygu horey u haysto kaarka maktabadda ee Scott County? Ardayda kaararka asalka ah ama horey u haysataey lama beddeli doono, weyna isticmaali karaan kaarkaas. Ma jiraan ganaaxyo la xidhiidha Kaarka Maktabadda Virtual Student Library? Kaadhka Maktabadda Ardayga waa akoonti bilaash ah gaaxna majiro haddii ardeygu buug la soo daaho, Si kastaba ha ahaatee, ganaaxyada waxaa lagu soo dallacayaa qalabka lumay ama waxyeelo soo gaadhay.

Virtual Student Library Card Opt-Out Form

Foomka Diidmada ee Kaarka Maktabadda

Ma doonayo in ilmahaygu ka qayb qaato Iskaashiga Kaarka ee u dhaxeeya Iskuulada Shakopee iyo Maktabadda Scott kaanti. Waxaan fahamsanahay in aan foomkan buuxin doono sanad kasta diidmada bixinta adeegyadan degmada. Fadlan ku soo celi foomkan xafiiska weyn ee dugsiaga ilmahaaga.

Muhiim in la buuxiyo:

Magaca ardayga: _____

Ardayga Magaca Dambe: (Last Name)

Lambarka aqoonsiga ardayga:

Saxiixa waalidka: _____

Taariikhda: _____